

**UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 22/03/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXISO:-</b> SAHARA ABDI GEDI, Hooyo: Kaltuumo Cali Siyaad, Somali ah, Ku Dhalatay: Mandera, Sanadkii: 01-01-1970, Sidata Kenyan passport, Lr. AK0087158	<b>LA WAKIISHE:-</b> ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI, Ina Sahra Sheekh Cabdi, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 04-11-1993, Degan Zoobe, Sita: Somali Passport, Lr. P01655122
<b>TILMAAMAHA GURIGA</b> Guri Dhisan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: ( <b>Ansalooti (Waaberi)</b> ), Cabirka: ( <b>11,50 X 11,50-Mt-M</b> ), Sida ku cad Warqadda Qeybin Dhaxal ( <b>30/89</b> ), <b>Tr. 10/5/89</b> , Kana Soo Baxday Maxkamadda Degmada Xamar Weyne, Ayna wada saxiixeen Garsooraha Maxkamadda Dr. Cabdiraxmaan Axmad Cusmaan iyo Kaaliye: Cabdi Ducaale Kaahiye	<b>SOOHDINTA GURIGA</b> Bari: <b>jid</b> , Koonfur: <b>jid</b> , Galbeed: Guri dad, Waqooyi: Guri dad

**B-** Aniga oo ah **SAHARA ABDI GEDI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Wiilkeyga **ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI** Una Wakiishay Qeybta Milkiyadda Aan Ku Leeyahay Guriga Asalkisa Aan Ka Dhaxalnay Marxuum Aabaheey **CABDI GEEDI SHAR MA'ARKE**, in Qaybtayda ii Xafidi karo, dayactiri karo, Gadi karo, kireeyn karo, dhisi karo, Qareen ii Qaban karo hadii loo baahdo, Xanaaneyn karo, igu matali karo magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, iigana doodi karo maxkamadaha dalka darajadooda kala duwan, iina sameen karo waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karo kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, una idman yahay in uu si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karo, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Qeybta aan ku leeyahay Gurigaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay Hooyadeey **SAHARA ABDI GEDI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**

SAHARA ABDI GEDI



1- MUHSIN ABDIRAHMAN AHMED



**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI



**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

2- ABDIAZIZ BASHIR ABDULLAHI



**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1468/T.P.N/25, Tr. 2 /03/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **SAHARA ABDI GEDI** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan Waxaa Laga Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



**MASAWIRKA LA WAKIISHAHA**

**ABDULLAH BASHIR ABDULLAHI**



*[Handwritten signature]*









JAMHUURIYADDA DEMUQRAADIGA SOMALIYA

MAXKAMADDA DEGMADA XAMAR WEEYNE L. 89

30/89 *Ishak*

Qaybin DHaxal

T.10/5/89

waxaa Geeriyooday Marxuum la Oran jiray CABDI GEEDI

ARMAARKE, somaali ah Geeriyooday 5/12/84, wuxuuna ka Geeriyooday

Guri ku Yaala Xamar, sida ku Cad W.M.L.602/74, kana soo baxday

Maxkamadda Degmada Xamar, waxaana DHaxalkiisa iska leh

DHaxaltooyada kala ah:-

- I- Kaltuuma Cali Siyaad, oo ah Kaaskii Marxuumka,
- 2-Caasha Cabdi Geedi, 54, jir ah waa Marxuumka Gabadhiisa.
- 3- Riqiya " " 50, " " " "
- 4- Xaliima " " 65, " " " "
- 5- Faadumo " " 73, " " " "
- 6 - Axmed " " 44, " " " Wiilk iisa.
- 7- Bashiir " " 42, " " " "
- 8- Maxamed " " 38, " " " "
- 9- Maxamuud " " 36, " " " "
- 10- Sacdiya " " 34, " " " "
- II- Remina " " 27, " " " "
- 12-Yuseen " " 24, " " " "
- 13-Yaasiin " " 21, " " " "
- 14- Sahra " " 18, " " " "
- 15- Maryan " " 15, " " " "
- 16- Aasiya " " 12, " " " "

intaas ayaa dhaxalkiisa iska leh sida ku cad Sugitaan L.49/89 ee T.28/2/89, kana soo baxday Maxkamadda Degmada X/weyne, Qaar kamid ah DHaxaltooyada Qaybtii ay ku lahaayeen way ka tana suleen sida ku cad Warqadda L.63/89, ee T.15/4/89, kana soo baxday Maxkamadda Degmada X/weyne, inta ka tanasushay dhaxalka waa kuwa soo socda:-

- 1-Axmed Cabdi Geedi, oo jira 44, kana mid ah dhaxaltooyada
- 2- Ruqiya " " " 50, " " " "

///2///

3-Caasha Cabdi Geedi, 54, Jir ahkana mid ah DHaxaltooyada

4-Xaliima " " 65, " " " "

waxayna Daxalkooda ugu tanasulay dhaxaltooyada ka

1- Kaltuuma Cali Siyaad, oo ah Hooyadood kana mid ah dh

2- Yuseen Cabdi Geedi, jira 24, kana mid ah DHaxaltooyada

3- Yaasiin " " " 21, " " "

4- Sahra " " " 18, " " "

5- Maryan " " " 15, " " "

6-Aasiya " " " 16, " " "  
intaa waxaa lasiiyay ama lagu tanasulay DHaxalkii aabahooda  
waxaa kaloo jira Qayb DHaxaltooyada kamid ah ee qaatay wixii  
ay lahaayeen kuwaa oo kala ah:-

1- Maxamed Cabdi Geedi, Jira 38, wuxuuna Qaatay H.S. 75.000/=

2- Maxamuud " " " 36, " " " H.S. 75.000/=

3- Roomina " " " 27, " " " H.S. 75.000/=

4-Sacdiya " " " 34, " " " H.S. 75.000/=

Labada Ruux ee kamid ah dhaxaltooyadana waa "aqan yihiin waxaa  
ku jiraan Gurigii la dhaxlay kuwaa oo kala ah:-

1- Bashiir Cabdi Geedi, jira 42, waa Maqan yahay guri ayuu ku jiraa

2- Faadumo " " " 73, " " " " " " "

Labadaasi waxaa lagu "eebay Guriga, kumana "jiraan Qaybta  
wax loo Tanasulay, Markii ay yimaadaan waa loo xidhiin Maqooda  
Sidaas darteed waa Qaybin dhaxal oo "nsax ah waxaa  
sharciga Maxkamadda waxay ku qortay buugga "dantaanka  
iyo Mucaamilaadka, waxaana Markhaati kuwaa dhaxalka

1- Cali Cabdi Aadan, somaali ah degan

2- Cusmaan Cabdi Cali, somaali ah degan

3- Ducaale Ciise Yuusuf, Somaali ah degan zamar

KAALIYAHA MAXKAMADDA

CABDI DUCAALE KAABIYE

MAXKAMADDA

GUSMAAN,



602174



REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA  
MAXKAMADDA DEGMADA XAMAR

Ujeedo: Siismo Guri: T.23/5/74.

Ninka layiraahdo Cabdulqaadir Geedi Guuleed Soomaali ah jira 45 sano D.X.D.waaberi.W.A.L. 11091. ka D.H.X. "axuu siiyay Gurigiisa Ku yaal X.D.Ansalooti(waaberi) ka kooban hal qol iyo musqul.W.DH. 11,50X11,50.M.

Soohintiisa Bari jid, Galbeed guri dad,W. guri dad, Koofur jid,W.M.L.9/6/65. T.18/8/65.ka D.H.X.Sh.

Cabdi Geedi Shar ma arke soomaali ah jira 78 sano D.X.D. Waaberi Waana aqbalay ninka lasiiyay Siismadaaas Siismadana waa ansax waana waafaqsan tahay qaanuunka maxkamadda waxey ku qortay buugga Mucaamilaadka.

Waxaana ka Marag ah.

- 1)- Axmad Maxamed Xasan.
- 2)- Mayow Cumar Aadan.

Kaaliyaha Maxkamadda Cabdulqaadir Sh. Umar

Garsooraha Maxkamadda Sh. Maxamed Sh. Maxamed



PER COPIA  
Mogadiscio, il  
CANCELLIERE

TRIBUNALE DISTRETTUALE DI MOGADISCIO

FORME ORIGINALI

4/1/1974

*Deqmad Waaberi*

*Ball 9  
Ball 6  
18/8/65  
9/63/12*

*Lasiiyay  
Cabdi Geedi Sharmarke*

*28/5/74*





## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 07/04/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/LLAAHI BASHIIR C/LLAAHI** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1468/T.P.N/25, Tr. 22/03/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	C/LLAAHI BASHIIR C/LLAAHI
<b>La Wakiishay</b>	Dhul
<b>Cabirka</b>	11,50 X 11,50-Mt
<b>Ku Yaallo</b>	Muqdisho, Degmada Ansalooti (Waaberi)
<b>Lotto Lambar</b>	
<b>W.M.L</b>	602/74, Tr. 23/05/1974 Maxkamada Maxkamadda Degmada Xamar
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	22/03/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **C/LLAAHI BASHIIR C/LLAAHI**, Leh Tel No. **0618555222**, Degan **Soobe** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

**Maxamed Cabdi Cali**

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

**C/LLAAHI BASHIIR C/LLAAHI**